

Shuruudaha Qalinjabinta

Ardeyda Minnesota si ay u qalinjabiyaan waxa looga baahan yahay:

- Qancinta dhamaystirka shuruudaha kareedid koorsooyinka gobolka.
- Qancinta dhamaystirka dhammaan heerarka taclinta ee gobolka ama maxaliga, kuna xiran hadba maadada.
- Buuxinta shuruudaha imtixaanka qalinjabinta.

Kareedid (Credits) Korsooyinka

Kareedid wuxuu la mid yahay waxbarashada hal sannad dugsiyeed ama dhammaystirka maadada. Waxay u taala dugsiya degmada in uu go'aansado haddii u ardeygu buuxiyay shurudihii kareedid ku kasban lahaa. Ardeydu waa in ay dhammaystiraan ugu yaraan 21.5 kareedid koorsooyinka meelaha hoos ku taxan si ay u qalinjabiyaan:

4 kareedid oo ah barashada afka Ingiriisiga

3 kareedid oo ah barashada xisaabta kuna jiraan aljebra, joomateriga, tirakoobka iyo ixtimaalka (probability). Ardeydu waa in ay dhammaystiraan Aljebra II ama wax u dhigma kana mid ah saddexda kareedid ee laga rabo iyo weliba dhammaystirka Aljebra I dhammaadka fasalka sideedaad.

3 kareedid oo saynis ah kana mid yahay hal kareedid oo bayoolaji (Biology) ah. Ardeydu waa in ay sidoo kale dhammeeyaan kemistri (chemistry), fisikis (physics), ama hal kareedid oo ah waxbarasho xirfadeed iyo farsamo (CTE) oo ka mid ah saddexda krediid ee la rabo. (Kareedidka CTE waa in uu buuxiyaa heerarka hoosyimaada kareedidka kemistiriga iyo fisikiska.)

3½ kareedid ee culuunta bulshada waxaa ka mid ah tariikhda maraykanka, joqarfiga, dawladda iyo jinsiyada, tariikhda aduunka iyo dhaqaalaha.

1 kareedid ee farshaxan

7 kareedid oo la doorto

Koorso waxbarashada beeraha ah ayaa buuxin karta shuruuda sayniska guud. Barashada xirfada iyo farsamada ayaa buuxin karta sayniska guud, xisaabta, ama shuruuda kareedidka farshaxanka. Dugsiyada degmooyinku waxay u baahan karaan koorsooyin karerdyo dheeri ah ama shuruudo kale si ay uga gudbaan heerka ugu yar ee qalinjabinta dowladu rabto.

[Boogo ama fiiri bogga imtixaanaadka Minnesota si aad wax uga barato shuruudaha imtixaanada qalinjabinta.](#)

La xariir dugsiyaaga si aad u ogaato shuruudaha qalinjabinta u gaarka ah ee degmadaada.

Nagala soo xariir 651-582-8200. Haddii aad tarjumad u baahato fadlan u sheeg soo dhaweynta afka aad ku fahmi kartid.